## Waa maxay aabonimada sharciga ah?

Aabonimo waxaa loola jeedaa aabaha sharciga ah. Aabonimada sharciga ah waa marka aabaha ilmaha dhalay u noqdo aabaha sharciga ah ee ilmahiisa haddii asaga iyo hooyada ilmaha dhashay aysan isqabin.

Haddii waalidka ilmaha aysan isqabin marka ilmuhu dhashay, ilmahaas ma lahan aabo sharci ah. Waalidku wuxuu u baahan yahay inuu sameeyo aabonimo sharci ah.

## Maxaan u sameynayaan aabonimada sharciga ah?

Aabonimada sharciga ah waxaad ka heli kartaa taageero sharci, dareen, bulsho iyo mid dhaqaale oo isku xira waalidka iyo ilmaha.

## Sidee aabaha dhabta ah, ama dabiiciga ah ee ilmaha u noqdaa aabaha sharciga ah?

Waalidiinta aan isqabin gobalka Ohio, waxaa la sameyn karaa aabonimada kadib marka la buuxiyo lana saxiixo foomka dhaarta qirashada aabonimada, baaritaanka hiddo-sidaha oo uu wehliyo amarka maamulka ee aabonimada ee wakaaladda fulinta taageerada ilmaha ee deegaankaaga (child support enforcement agency, CSEA) ama amar maxkamadeed ee aabonimo

## Waa maxay Foomka Dhaarta Qirashada Aabonimada?

Haddii aysan isqabin, labada dhinacna aqbalaan inay yihiin waalidka dhabta ah ee ilmaha, "Foomka Qirashada Aabonimada (JFS 07038)" ayaa la buuxin karaa. Kadib marka ay saxiixaan foomka, waalidku wuxuu oggolaanayaa aabonimada sharciga ah ee ilmahooda - oo loola jeedo aabaha sharciga ah ee la aqoonsaday. Buuxinta foomka waa ikhtiyaar, waana bilaash, waana qaabka ugu fudud ee lagu sameeyo aabonimada sharciga ah.



## Maxaa dhacaya haddii aanan hubin cidda aabaha dhabta ah?

Midkood waalidka ayaa ka codsan kara CSEA inay sameyso baaritaanka hiddo-sidaha. Foomka Dhaarta Qirashada Aabonimada waa inaan la isticmaalin illaa in labada waalid aysan hubin maahee in ninka lagu xusay foomka uusan ahayn aabaha dhabta ah.

## Yay tahay INUUSAN buuxin foomka qirashada?

- Hooyo la qabo
- Hooyo la furay muddo 300 maalmood gudahood ah kadib marka ilmuhu dhashay
- Hooyo si sharci ah ku kala tageen ninkeeda

Waxaa sidoo kale jira marxalado kale oo gaar ah oo ka hor istaagaya in shaqsigu isticmaalo foomka dhaarta ee qirashada aabonimada. Haddii aadan hubin, fadlan la xariir CSEA ka deegaankaaga.

## Halkee ka helayaa foomka dhaarta qirashada?

- Isbitaalka marka ilmahaagu dhasho
- Xafiiska diiwaangelinta maxaliga ah (oo sidoo kale loo yaqaan Tirakoobka Muhiimka ah ama Waaxda Caafimaadka) kadib marka ilmahaagu dhasho
- Xarunta CSEA ga deegaanka kadib marka ilmahaagu dhasho
- Kadib marka aad wacdo waaxda Diiwaangelinta Dhexe ee Aabonimada (Central Paternity Registry, CPR) ee Ohio oo kutaala 1-888-810-OHIO (6446) aadna ka codsato in nuqul boosto kuugu soo diraan

## Maxaan ku falaa foomka dhaarta qirashada si uu u noqdo mid rasmi ah?

Labada waalidba waa inay saxiixaan foomka dhaarta qirashada ayagoo jooga xarun Nootaayo Dawladeed ama ay la joogaan labo qof oo waawayn waana inay foomkooda qirashada lagu shaambadeeyo nootaayo ama ay saxiixaan marqaatiyaasha. Labada waalidba ma ahan inay wada saxiixaan hal mar.

Waalid kasta wuxuu u baahan doonaa aqoonsi sawir leh (sida ruqsada darawalnimada) iyo lambarka Amniga Bulshada (haddii ay haystaan).

## Ilmaha yaryar ma saxiixi karaan foomka dhaarta qirashada?

Haa, ilmaha yaryar waxay foomka dhaarta u saxiixi karaan sida waalidka (waa inaysan marqaati ahaan u saxiixin).

## Qof aan ahayn muwaadin Mareykan ah ma saxiixi karaa foomka dhaarta qirashada?

Haa. Lama eegaayo dalka waalidku u dhashay, haddii ilmuhu ku dhashay Ohio ama mid ama labadaba waalidba ku nool yihiin Ohio, Aabonimada sharciga ah waa la sameyn karaa. Foomka dhaarta qirashada looma adeegsado in lagu oggaado dadka aan Mareykanka u dhalan.

## Goorta ayuu foomka dhaarta qirashada noqonayaa kama dambeys?

Foomka dhaarta qirashada wuxuu kama dambeys noqonayaa 60 maalmood kadib marka saxiixa ugu danbeeya la saaro, haddiiba qof kale uusan su'aal ka keenin aabonimada, iyo kadibna marka foomka dhaarta si sax ah loo saxiixo, loo saaro nootaayada kadibna loo gudbiyo waaxda Diiwaangelinta Dhexe ee Aabonimada.

## Kawaran haddii aan is badelo kadib marka aan saxiixo foomka dhaarta qirashada?

Labada waalidba waa ay joojin karaan hawsha waqti kasta 60 maalmood gudahooda marka la saxiixo iyagoo la xiriiraya CSEA ka deegaankooda. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah fadlan eeg Su'aalaha inta Badan la Isweydiiyo ood ka helayso www.oh-paternity.com.

## Haddii ninku saxiixo foomka qirashada, ma waxaa qasab ku noqon doona inuu bixiyo dakhliga taageerada ilmaha?

Marxalada ayay ku xiran tahay. Labada waalidba waxaa saaran waajibaad ah inay taageeraan ilmahooda. Haddii ilmuhu helaayo qaar kamid ah dheefaha, waxaa laga in aabaha laga dooni doono inuu bixiyo taageerada ilmaha. La xariir CSEA ka deegaankaaga si aad ogala hadasho xaalada aadna u hesho jawaabaha gaar ah.

## Sidee masuuliyada iyo booqashada loo go'aamiyaa?

Sameynta aabonimada iyo masuuliyada waa labo arrin oo kaladuwan. Haddii hooyada aan la qabin waqtiga ilmuhu dhalanaayo, waxay si ootamaatig ah u noqonaysaa qofka masuulka ka ah ilmaha. Marka aabonimada la meelmariyo, aabuhu wuxuu dalban karaa xuquuqaha booqashada ama masuuliyada asagoo maraya nidaam maxkamadeed.



## Dheefaha Aabonimada Sharciga ah

### Aqoonsiga

- Waxay u oggolaanaysaa in labadaba hooyada iyo aabaha inay la yeeshaan xiriir dareen oo ay la wadaagaan ilmahooda iyo inay qaybsadaan mas'uuliyadda iyo abaalgudka waalidnimada.
- Magaca aabaha ayaa kasoo muuqan doona shahaadada dhalashada ilmaha wuxuuna helayaa xuquuqaha sharciga ee ilmahiisa.

### Masuuliyada iyo Booqashada

- Marka aabonimada la meelmariyo, aabuhu wuxuu dalban karaa xuquuqaha booqashada ama masuuliyada asagoo maraya nidaam maxkamadeed.

### Dhaqaalaha

- Labada waalidba waxaa saaran masuuliyad dhaqaale.
- Waxaa laga yaabaa in ilmuhu helo dheefaha sida kuwa Amniga Bulshada (Social Security), caymiska nolasha, dheefaha militariga, dhaxalka, iyo taageerada ilmaha.

### Caafimaadka

- Ilmuhu wuxuu sidoo kale heli doonaa caymiska caafimaadka aabihiis iyo sidoo kale taariikhda caafimaadka qoyska iyo abtirsiinta labadaba.



2012.000072.01

## Barnaamijka Sameynta Aabonimada Sharciga ah

*Si aad u oggaato xog dheeraad ah oo ku saabsan:*

**Sameynta Aabonimada sharciga ah**

**Su'aalaha badanaa La iswaydiiyo**

**Xogta Xiriirka Muhiimka ah**

**Haddii foomka qirashada kugu habboon yahay**

*Fadlan booqo:*

**www.oh-paternity.com**

*ama wac:*

**1-888-810-OHIO (6446)**



Mike DeWine, Guddoomiyaha
Gobalka Ohio

Matt Damschroder, Agaasimaha
Ohio Department of Job and Family Services

Office of Child Support

Hay'adaan waa bixiye iyo loo shaqeeye fursado loo siman yahay.

JFS 08079-SOM (Rev. 10/2023)

Department of Job & Family Services



# "Waa maxay saameynta gaarka ah ee Aabuhu Keenaayo!"

**Xog ku saabsan Barnaamijka Sameynta Aabonimada Sharciga ah iyo Foomka Dhaarta Qirashada Aabonimada.**